



XAADIRITAANKA IYO SIYAASADDA WAQTIGA LA BEEGSANAYO

Hordhaca iyo Ujeedada

Dugsiga Hoose ee Haslam Park wuxuu aqoonsan yahay in xaadirista wanaagsan tahay muhiim si kor loogu qaado tayada iyo guusha ardayga. Si ay uga helaan carruurteena faa'iidada ugu weyne waxbarashadooda waa muhiim inay si joogta ah u xaadiran oo canuga waa inuu joogaa dugsiga, waqtiga, maalin kasta haddii aysan jirin sabab ku maqnaado.

Siyaasaddan waxaa lagu qoray maskaxada bayaanka kor lagu soo xusay siyaasaddanna waxay taageeri hab dhaqanka dugsigeena in:

- ❖ Ay hormariso fayyo-qabka iyo ilaalinta carruurta;
- ❖ Ay hubiso arday kasta in uu helo waxbarsho waqti buuxa taas oo ay xaq u leeyihiin.
- ❖ Ay Hubiso guusha ardayga inta uu ku jiro dugsiga.

Maxay muhiim u tahay Xaadiritaanka Joogtada ah

Waxbarashada:- Maqnaansho walba waxay waxyeelaysaa habka iskuulka ee ardayga maqnaanshaha joogtada ahna wuxuu aad u saameyn doonaa waxbarashadooda. Maqnaanshaha arday walba waxay dhibeysa wadooyinka barista sidaas darteed waxaa laga yaaba inay saameeyso waxbarshada kuwa kale ay isku fasalka yihiin. Cadeynta laga helay dugsiyada Hoose iyo dugsiyada Sare waxay muujinayaan xaadiritaanka wanaagsan 95% iyo wixii ka sareeya inay keento buundooyinka sare ee sannadka 6 iyo heerka sare ee fasalka GCSE. Hubinta xaadiritaanka joogtada ah ee ilmaha dugsiga waa masuuliyaddaada sharciga iyo fasaxa maqnaanshaha dugsiga oo an laheyn sabab wanaagsan waxay abuureysa dambi laga galay sharciga waxaana laga yaaba inay sababto maxkamad.

Caawinta in la abuurto hab xaadirista joogtada ah waa masuuliyadda qof kasta – waalidiinta, ardayda iyo dhamaan xubnaha shaqaalaha dugsiga.

Si ay noo caawiso dhamaan xoog saaridda tan waxaan:

- ❖ Wargelin doonaa waalidka/daryeelaha ugu yaran kala barka teeramka sida canuga ugu dadaalayo dugsiga, waxa u yahay xaadiritaankooda iyo qiimaha waqtiga iyo sida ay ula xiriirto guulahooda;
- ❖ U daabaal degi doonaa xaadiritaanka wanaagsan ayadoo la soo bandhigaya shaqsigu iyo guusha fasalka;

- ❖ La xiriiri doonaa waalidiinta/daryeelaha haddii u ka hooseeyo xaadiritaanka canuga hadafka xaadiritaanka dugsiga.

Fahamidda noocyada maqnaanshaha:

Maqnaansha galin kasta dugsiga waa inuu kala saara dugsiga (ma ahan waalidiinta inay kala saaran), sida FASAXA AMA FASAX LA'AANTA. Tani waa sababta ku saabsan xogta sababta maqnaansho kasta looga baahanyahaymar kasta qoraal.

Fasaxa maqnaanshaha waa subixii ama galbihii oo looga maqan yahay dugsiga sababo la xiriira jirooyin, caafimaad/ballamaha dhakhtarka ilkaha taas oo aan ka hoos mari karin waqtiga dugsiga, xaaladaha degdega ah ama sababaha kale ee aan la iska ilaalin karin.

Maqnaanshaha aan fasaxa aheyn waa ku aan dugsiga tixgelinin oon la siinin "fasax". Nooca maqnaanshaha wuxuu ku keeni karaa maamuulka isticmaalista cunaqabatayn iyo/ama dacwadaha sharciga. Tani waxaa ka mid ah:

- ❖ Waalidiinta/daryeelaha oo uga ilaaliya carruurta dugsiga sabab la'aan
- ❖ Maqnaanshaha ka hor ama inta lagu jiro maalin laha dugsiga
- ❖ Maqnaanshaha oo aan marnaba loo sharaxin si ku haboon
- ❖ Caruurta imaata dugsiga waqti danbe loo calaamadiyo
- ❖ Dukaamaysiga, raadinta xanaaneynta carruuta kale ama dhalashooyinka
- ❖ Maalmaha fasaxa iyo safarada waqtiga waxbarashada taas oo aan la isku raacin.

Maqnaanshaha Dheer

Ardayga noqda 'maqnaade muddo dheer' marka ay waayaan 10% ama ka badan sanad dugsiyeedka sabab walba oo ay tahay. Maqnaanshaha heerkan waa samaynta waxyeelaynta la arki karo oo ah waxbarashada canug walba waxaana u baahanahay taageerada buuxda ee waalidka iyo wada shaqeynta si wax looga qabto.

Waxaan daba galna dhammaan maqnaanshaha iyo sababaha la bixiyay. Arrin kasta oo loo arko inay gaartay calaaminta maqnaanshaha dheer ama khatar ugu jirto dhinaca calamadaas waxaa la siiyay mudnaan waxaana ogeysiin doonaa isla markiiba waalidiinta/daryeelaha. Sarkaalkeena Xaadiritaanka Sarkaalka Xafiiska Waalidka/Miyiga ayaa masuul ka ah tani.

Qaababka Maqnaanshaha:

Haddii u canuga maqan yahay waalidka/daryeelaha waa inuu raaca qaababka soo socda:

- ❖ Ula xiriir dugsiga sida ugu dhaqsiiyaha badan maalinta koowaad ee maqnaanshaha. Dugsiga wuxuu leeyahay jawaabta teleefoonka ee la heli karo ee fariinta aad ku dhaaftay haddii aan uuna jirinqof qaabta wicitaanka.

- ❖ U dir fariin agaasimaha dugsiga maalinta koowaad ay ku soo labanayaan oo leh sharaxaada maqnaanshaha – waalidka/daryeelaha waa inuu sameeyaa tan xataa haddii aad na soo wacday.
- ❖ Ama wac dugsiga oo wargeli soo dhawaaynta.

Haddii u canuga maqanyahay waxaan:

- ❖ Teleefan u diri doonnaa waalidka/daryeelaha maalinta koowaad ee maqnaanshaha haddii aan maqlin waalidka/daryeelaha;
- ❖ Ku casuumi doonnaa waalidka/daryeelaha si loogala hadlo xaaladda Sarkaalkeena Xaadiritaanka iyo/ama Waalidka iyo Hogaamiyaha Miyiga
- ❖ U gudbin doonnaa arrinta Maamuulka Deegaanka haddii xaadiritaanku ka hooseeyo 85%.

Fadlan fiiri tusiyaha 1:Nidaamka Haslam Park.

Waalidiinta waxaa laga filaya inay la soo xiriiran dugsiga marka hore oo ay kala shaqeeyan shaqaalaha si wada jir ah xalinta dhibaatooyinka kasta. Tani marwalba waxay u dhawdahay guusha. Haddii dhibaatooyinka lagu xalin wayo qaabkan, dugsiga waxaa laga yaaba inuu u gubiyo canuga Adeegga Waxqabashada Hore. Waxay/Wuxuu sidoo kale isku dayi doonaa inay ku xaliyaan xaaladda heshiis laakiin, haddii qaabka kale ay isku dayga ay hagajiso xaadiritaanka canuga way guuldareysatay ama maqnaanshaha aan fasaxa aheyn jiro, sarakiishan ayaa isticmaali kara cunaqabataynta sida Ogaysiiska Ganaaxa ama digniinada Maxkamaddaha.

Xeerka qodobka 444 ee Xeerka Waxbarshada, waalidiinta ayaa lagu ganaaxi karaa ilaa £2500 ama wajihi karaan 3 bilood oo xabsi ah haddii ay ku guuldareysan inay hubiyaan xaadirista joogta ah ee dugsiga carruurtooda.

Canuga Seega Waxbarshada

Haddii u canug ka baxo dugsigeena, waalidiinta waxay soo ogeysiin doonaan faafaahinta dugsiga xiga ee u canuga xaadiri doonoo. Haddii uu waalidka samayn waayo sidan, dugsiga wuxuu ogeysiin doonaa Adeegyada Carruuta waxayna raaci doonaan qaabka lagu xusay foomka CIME . Fadlan fiiri Tusiyaha 2: Foomka CIME.

Haddii sodon maalmood kadib, dhammaan nidaamyada laga helay foomka laga dhammaystiray lana buuxiyay, dugsiga wuxuu canuga saari doonaa diiwaanka wuxuuna ka tirtiro doonaa dhammaan maqnaashaha laga bilaabo maalinta uu tagay.

Fadlan fiiri Tusiyaha 2: Foomka CIME Haslam Park.

Dugsiga wuxuu raacaa nidaamka lagu sameeyay Tusiyaha 3: U wareeji Nidaamka Dugsiga.

Dib u dhaca

Wakhti ilaalinta liita ma la aqbali karo. Haddii canuga uu seego bilowga maalinta waxay seegi karaan shaqo waqti badanna ma la qaadan karaan macalinkooda si ay u helan macluumaad muhiim ah. Ardayda timaada waqti danbe sidoo kale waxay dhibaataynayaan casharada, waxay

ceeb ku noqon kartaa canuga waxayna sidoo kale dhiiragalin kartaa maqnaanshaha. Ilaalinta waqtiga wanaagsan waxay muhiim u tahay xirfadda nolosha taas oo caawin doonta carruurteena sida ay u gudbaan nolasha dugsigooda iyo ka baxsan dunida ballaran.

Sideen u maareyn karnaa dib u dhaca:

Maalinta dugsiga waxay ka bilaabataa **8.50 galin hore** waxaana filayna inay carruurta joogaan garoonka ciyaarta **8.45** galin hore diyaarna ay ku ahaadan laynka inta aan fariinbiga la yeerinin.

Diiwaanada waaxaa la saxaya **8.55 galin hore** canuga wuxuu helaya saxida danbe haddii aysan waqtigas ku jirin.

9.20 galin hore diiwaanada waa la xiri doonaa. Sida waafaqsan Xeerarka haddii canuga u yimaado waqtigas kadib waxay heli doonaan saxida muujineysa inay joogeen, laakiin tan ma loo xisaabin doono sida saxida xaadiritaanka waxay la micno tahay maqnaanshaha aan saxda aheyn. Tani waxaa laga yaaba inay la micno tahay inay waalidka/daryeelka ay wajihi karaan Ganaaxa Ogeysiinta surtagalnimada ah haddii u sii jiro dhibka. Haddii u canuga qabo dhibka dib udhaca diiwaanka waalidka/daryeelaha waxaa la weydin doonaa inay la kulmaan Maamuule Ku xigaanka iyo/ama Sarkaalka Xaadiritaanka si loo xaliyo dhibka, laakiin waalidka/daryeelaha ayaa noo soo dhawan karaa waqti kasta haddii ay qaban dhibaatooyinka inuu canuga ku yimaado waqti dugsiga.

Waxaan idin ku dhiiragalin doonaa xaadirista wanaagsan iyada oo loo dabaldagayo xaadirista wanaagsan ee fasalka. Abaal marinta Waqtiga waxaa la siin doonaa fasalka toddobaad laha kaas oo leh carruur badan 8:50 galin hore. Nidaamka waqtigana waxaa lagu socdo xiliyada kala bar teeramka.

Fasaxyada ku jira Waqtiga Teeramka:

Ma jirto xaq u yeelashada sharciga tooska ah ee dhammaadka waqtiga dugsiga si loo aado fasaxa.

Laga bilaabo Sibtembar 2013, Maamuulayaasha ma laga yaabo inay damaanad qaadan fasaxa in ay jiraan daruufo gaar ah mooyaane.

Qaadashada fasaxa waqtiga teeramka waxay sameeyn doontaa waxbarashada canuga sida badan inta kale ee maqnaanshayasha kale, waxaan filayna waalidiinta si ay nooga caawiyaan ardayda aan qaadanin waqtiga dugsiga. Haddii waalidka/daryeelaha ay doortan inuu canuga ka bixiyaan dugsiga inta lagu jiro xiliga waqtiga kadib ma loo ogolaan doono waalidka/daryeelaha waxaa lagu ganaaxi doonaa £60 (hadda) waalidkiiba, canugiiba. Intan waxaa u dheer magaca canugan in laga saari karo diiwaanka dugsiga. Waa muhiim inaad fahamto xiliga waqtiga fasaxa inaad nagu raaci **doonin** anaga.

Hadafyada Dugisga

Dugsiga wuxuu leeyahay hadafyada hagajinta xaadiritaanka canugana wuxuu qayb muhiim ah ka yahay in uu ka qaybqaato waafaqidda hadafyadan.

Hadafyada dugsiga iyo fasalada waxaa loogu soo bandhigaya dugsiga waalidka./daryeelaha na waa inay waqti u qaatan inay bartaan.

Heerka ugu yar ee xaadiritaanka dugsigan waa xaadiritaanka 95%. Hase yeeshee hadafkeena waa guul ka wanaagsan tan maxaa yeelay waxaan ognahay xaadiritaanka wanaagsan waa muhiimada wanaagsan ee guusha dugsiga waxaan aaminsanahay inay ardaydeena noqon karaan kuwa ku wanaagsan.

Sanad dugsiyeedka oo dhan waxaan dabagalna maqaanshaha iyo joogidda si ay noo tusto halka looga baahanyahay in loo sameeyo hagajin.

Soo koobid:

- ❖ Dugsiga wuxuu leeyahay masuuliyadda sharciga ah ee lagu daabaco tirada xaadiritaanka Maamuulka, iyo waalidiinta/daryeelasha.
- ❖ Waalidiinta waxay leeyihiin waajibaadka sharciga si loo hubiyo inay carruurtooda u xaadiraan si joogta ah dugsiga iyo waqtiga.
- ❖ Dugsiga wuxuu go'aansaday inuu la shaqeeyo waalidiinta si loo gaaro heerka ugu sareeya ee suurtagalka xaadiritaanka.